

UJEEEDO: (HESHIIS KU SAABSAN KIRO GURI FILO AH)

Muqdisho Maanta oo ay taariikhdu tahay **25/1/2022**, Anigoo ah **Dr, Maxamed C/llaahi Maxamed "Max'ed Notaayo"** Lehna Nootaayaha Tayo, Xafiisna ku leh Wadada Koowaad ee Suuqa Bakaaraha dhabarka Danbe ee Hotel Waheyn ee Magaalada Muqdisho, Waxaa iiyimid ayagoo heshiis ah, Mudanayaasha hoos ku Xusan:-

Anigo ah **C/llaahi Maxamed Siyaad** Hooyo Xaliimo Rooble Geelle, Ku Dhashay Muqdisho Sanadkii:- 1970, Sita Somali Pass Lr: P00988016, Waxa aan Qoraalkaan Ku Cadeeynaya anigo Maskaxdeeda Taam tahay Cid I Qasabtayna aysan Jirin in aan ka Kireeyay **Cali-Saciid Axmed Geedi** Guri Filo ah Oo Ka Gooban Afar Qol iyo Labo Musqulood iyo Jiko Oo Jankeel leh. Waxaana ku heshiinay qodobadaan soo socda.

- 1- Kiradda Bisha waa USD \$250(Labo Boqol Iyo Kontan Oo Dollarka Mareykanka ah) Waxaana Uu Hormariyay Lacag Dhan \$500(Shan Boqol Oo Dollarka Mareykanka ah).
- 2- Kiradu Waxay ka Bilaawaneesa 1/Feb/2022, Waxayna Ku Eg tahay 31/March/2022, Lacagta Kirada Bilkasta Waxa Loo Dhiibaya Hormaris Wuxuu Bixinaya Bisha Markay Tahay Kowda ama Ugu Danbees Shanta Bisha Markay Mareeso.
- 3- Haddii Kireystaha uu ka guurayo guriga ama milkiiluhu u baahdo guriga labada dhinacba waa in ay soo sheegaan bil ka hor (Ogeysiis).
- 4- Kireystuhu wuxuu guriga ku kordhinayo ama ka badelayo, waa in uu soo wargaliyaa milkiilaha.
- 5- Kireystaha inta uu degan yahay gurigaan wixii dhibaato ah ee ku yimaada, asaga ayaa samaynayo oo mas'uul ka ah.
- 6- Kireystuhu guriga markii uu ka baxaayo sidii sii hore ayuu ku soo celinayaa (Dacaytir).
- 7- Qodobada lagu heshiiyey cidii ka baxdaa labada dhinac iyada ayaa mas'uul ka ah wixii ka yimaada.

Aniga oo ah **Cali-Saciid Axmed Geedi**, Hooyo Nadiifo Maxamed Xuseen, Ku Dhashay G/Kacyo, Sanadki: 1982 Sita National id: 28204178209021, Waxaan Heshiiskan Dhankayga ku caddeynayaa in **C/llaahi Maxamed Siyaad** Uu iga kireeyay guriga Uu Sare Uga Soo hadalay isla Markaana aan Anigu raali ku ahay kuna qancay heshiiskan kiradda ah ee qodabadiisu Kor ku xusan yihiin.

Anigo Ah **Khaliif Maxamuud Yuusuf (Cigaal)** Waxaa aan Qoraalkaan Ku Cadeeynaya kireestaha lagu Magacawo **Cali-Saciid Axmed Geedi**, in aan Daaminu Maal ka ahay.

Anago kala ah 1-Maxamed Cabdi Cali, 2-Cabdi Casiis Cali Cabdulle Waxaa Markhaatiyaal ka Nahay Heshiiskan.

SAXIIXA KIREEYAHA GURIGA
1-C/llaahi Maxamed Siyaad

SAXIIXA D-MAALKA KIREESTAHA
Khaliif M/ud Yuusuf (Cigaal)

SAXIIXA KIREESTAHA GURIGA
2- Cali-Saciid Axmed Geedi

1-Maxamed Cabdi Cali

SAXIIXA MARKHAATIYAASHA

2-Cabdi Casiis Cali Cabdulle

(XAFIISKA NOOTAAYAHA)

REP. 059/T.P.N/21, Tr. 25/1/2022, Muqdisho, Anigoo ah Nootaayaha Tayo:- **Dr, Maxamed C/llaahi Maxamed "Max'ed Notaayo"** Waxaan Sugayaa in Saxiixyada Kor Ku Xusan ay yihiin Saxiixyadii Runta ahaa ee C/llaahi Maxamed Siyaad Ahna (Kireeyaha Guriga) 2- Cali-Saciid Axmed Geedi (Ahna Kireestaha), 3- Khaliif Maxamuud Yuusuf (Cigaal) (Ahna Damiinu-Maalka Kireestaha) iyo Markhaatiyaasha, Waxaana Laga Wada Saxiixay ayagoo Raali ah, Caafimaad Qaba, Maskaxdoodu Taam tahay, Cid Khasabtayna aysan jirin Ka dib Markii Loo Aqriyey Caddeyntaan, Waxaa Lagu Qoray Diiwaanka Guud ee Nootaayada Waxaana Loo Keydiyey Nuqul.

By: Shaxane



NOOTAAYAHA


Dr. Maxamed C/llaahi Maxamed "Max'ed Notaayo"

JAMHUURIYADDA SOMAALIYA
جمهورية الصومال
SOMALI REPUBLIC



WARAQADDA AQQOONSIGA
بطاقة الهوية
IDENTITY CARD

L. Qaranka/الهوية/National ID
28204470209021



Magaca/الاسم/Name
ALISAID
AHMED GEDI



Taariikhda dhalashada/الميلاد/Birth
17 Apr 1982 GALKAIO

Taariikhda la bixiyay/الاصدار/Issue
19 Jan 2019 MOGADISHU

Taariikhda uu dhacayo/الانتهاء/Expiry
18 Jan 2024

Lab/Dheddig/الجنس/Gender
MALE

FOOMKA BIXINTA KIRO ORJINAALKA AH

REP. 059 /2022.

Tr, 29/01 /2022,

Magaca iibsadaha: →

Magaca qaadaha: →

Alleahi Maxamed Syaal.

Meeshuu deganyahay →

Hawa Saag

Telfoonkiisa: →

SAXIIXA BIXIYAHA:



SAXIIXA QAADHA:
